Aduunyadu waa raaxo, raaxada Aduuna waxaa u khayr badan Gabar saalixad ah

Cabdulaahi Binu Camar Allaha ka raali ahaado isagiyo Aabihiye waxaa laga wariyey in Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee uu yiri: Aduunyadu waa raaxo, raaxada Aduuna waxaa u khayr badan Gabar saalixad ah.

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in Aduunyada iyo waxa dhex yaalaba ay yihiin wax waqti kooban lagu raaxaysto, ka dibna tagaya, raaxada Aduun waxaa ugu fiican xaas saalixad ah, taasoo markuu ninkeedu eego farxad gelisa, markuu wax farana adeecda, markuu ka maqnaadana nafteeda iyo maalkiisaba ilaalisa.

http://www.sunnah.global/hadeeth/so/show/5794